

**Isbeddellada Barnaamijka iyo Nidaamka OFI ee ku Meelgaarka ee sababay COVID 19 (karoonaviruska cusub)**  
**6<sup>da</sup> Abriil, 2020**

**SNAP – Manfaca gargaarka ee Kabka Cuntada**

- Shuruudaha shaqada ee looga baahnaa dhammaan kuwa qaata waa la joojiyay
- Dadka guri ku-wada nool waxay heli doonaan manfacyada ugu badan ee suurtoogalka ah ee bisha Abriil iyo Maajo
- Shuruudaha soo sheegida iyo dib eegista wakhti ayaa lagu daray si aqalka qoyska loo siiyo wakhti dabacsan
- Ma jiri doono wareysi la iska doonayo
- Isticmaal deeqsinimo ee sabab wanaagsan ee shuruudaha caddaynta
- Arjiyada iyo dib u cusbooneysiinta waxaa lagu dhammayn karaa oo lagu saxiixi karaa caddayn afka ah ee dhinaca telfoonka ah)
- Manfacyada Kabka ee Shaqaalaha (Worker Supplement Benefit) (WSB) waxaa lagu dari doonaa iyadoo horey u ahayd \$50 ay noqonayso \$100 bishii ilaa bisha Luulyo 2020

**MaineCare – Gargaarka caafimaadka ee Medicaid**

- Ma jiri doono caymis caafimaad ee canug ama qof qaangaar ah ee laga xiri doono inta lagu jiro xaaladdan deg-degga ah
- Caddayn afka ah (is-caddayn) waa la oggol yahay shuruudaha intooda badan
- Ma jirayo wax lacag laga bixinnayo barnaamijyadii la iska dooni jiray in lacag laga bixiyo

**TANF – Caawinaada Kumeel-gaarka ah ee Qoyska Baahan**

- Wakhti dheer ah oo ka badan xadkii 60 kii bilood ayaa isla markiiba la siin doonaa
- Qoysaska horey u isticmaalay 60 bilood oo TANF ah dib ayay u codsan karaan oo wakhti ayaa loogu dari karaa haddii ay xaq u leeyihiin
- Ma jiri doono wareysi waji-ka-waji ah oo loo baahnaan doono
- Ma jiri doono qoys laga goynayo inta xaaladdan deg-degga ah lagu jiro

**Xusuus muhiim ah**

- Lambarka qatka tooska ah ee Gargaarka Guud **1-800-442-6003**
- Markastaaba waa suurtoogal in dadka qaata barnaamijka SNAP kuwa qaata ay qof kale oo ay iyagu aaminaad ku qabaan uu isticmaalo kaarkooda EBT ga oo dukaanka wax uga soo iibiyo wixii aqalka qoyska looga baahan yahay ee SNAP, qofkaas waxa kaliya u baahan yahay kaarka iyo lambarka sirta ah
- Kala soo xiriir OFI qatka internetka ama dhanka telfoonka oo ku soo wargeli wixii isbeddel ah ee ku yimaada xaaladdaada goorta isbeddelada ay dhacaan

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan isgaarsiinta OFI, dalabyada codsiyada iyo barnaamijyada wixii ka soo cusboonaada:

[www.maine.gov/dhhs/ofi](http://www.maine.gov/dhhs/ofi)

Macluumaad dheeri ah ee la xiriira Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee ilaha karoonaafariska

[www.maine.gov/dhhs/coronavirus-resources.shtml](http://www.maine.gov/dhhs/coronavirus-resources.shtml)

Dokumentigan waa la cusboonaysiin doonaa.  
Fadlan si joogto ah noogu soo noqo wixii xog ee soo cusboonaada.